

Ma la kulantay dembi nacayb ah oo laguula kacay isirkaaga, midabkaaga, wadanka aad ka soo jeedo, diintaada, naafonimadaada, rabitaankaaga jinsi, ama aqoonsiga jinsigaaga?

Ma la kulantay dhacdo eexasho ah oo laguula kacay isirkaaga, midabkaaga, wadanka aad ka soo jeedo, diintaada, naafonimadaada, rabitaankaaga jinsi, aqoonsiga jinsigaaga, xaaladaada socdaalka, militariga ama xaaladaada askari-hore, ama isticmaalka xayawaan tababaran?



SOO SHEEG NACAYB. HEL CAAWIMO.

La xiriir Khadka Caawimada Dembiyada Nacaybka iyo Dhacdooyinka Eexashada ee Gobolka Washington (Washington State Hate Crimes and Bias Incidents Hotline) ee Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud (Attorney General's Office).

Khadka Caawimada ee Washington Hate Crimes and Bias Incidents wuxuu diyaar u yahay inuu ku caawiyo haddii aad dhibane u ahayd, la kulantay, fal nacayb ama eexasho ah. Khadka Caawimada wuxuu diyaar kuula yahay inuu kugu xiro adeegyo maxalli ah, dhibbanaha ku taxaluqa, dhaqan ahaan karti leh, oo xog ogaal u ah dhibaataada.

Soo sheeg nacaybka oo caawimo hel adigoo la xiriiraya Khadka Caawimada:

Khadka: <https://www.atg.wa.gov/report-hate>

Taleefanka: 855-225-1010